



Farriintani waxaa iyada oo ah Ingiriisi, Af-Ruushka, Simplified Chinese, Soomaali, Isbaanish iyo Vietnamese la soo geliyay :

<https://www.oregon.gov/dhs/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Agoosto 20, 2021

Ku socota: Hay'adaha Maamulka Kiiska iyo Daryeel Bixiyayaasha ODDS  
Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Ujeedada: Is xasuusinta Shuruudaha looga baahan yahay Wax soo sheegista

Farriintani waa is xasuusinta shuruudaha looga baahan yahay wax soo sheegista ee COVID-19 ee loogu talagalay daryeel bixiyaasha, hay'adaha maamulka kiiska iyo shaqaalaha daryeelka shakhsiyeed (PSW).

Kiisaska COVID-19 ee gobolka oo dhan iyo nidaamka naafanimada korriinka ayaa sii kordhaya. Waa muhiim in Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka (ODDS) uu hayo macluumaad ku saabsan kiisaska la xaqiijiyay in ila qabo cudurka si la iskugu wargeliyo siyaasada oo loola xiriiro hawl-wadaagayaasha oo ay ku jiraan maamulka caafimaadka ee degaanka si looga caawiyo taageerada hadba sida loogu baahan yahay. Waxaan sidoo kale u baahanahay macluumaadkan si loo taageero caafimaadka iyo badbaadada dadka qaba naafanimada maskaxda iyo korriinka. Waxaa looga baahan yahay CME, daryeel bixiyayaasha iyo PSW in ay raacaan nidaamyada ogeysiinta ee lagu tilmaamay [Habka Waxyaabaha Dhici kara ee ODDS](#). Farriinta wax gudbinaysa ee [AR 20-099](#) ayaa faraysa isticmaalka foomka soo sheegida ee ODDS COVID-19, kaasi oo ku xiran [Habka Waxyaabaha Dhici kara ee ODDS](#).

Haddii qof ka tirsan yahay adeegyada guriga-dhexdiisa tijaabadii laga qaaday lagu ogaaday in uu qabo cudurka COVID-19, PSW ayaa ku wargeliya Hay'adaha Maamulka Kiiska iyada oo Hay'adaha Maamulka Kiiska ka dib markaa ku wargelisa ODDS. Hay'adaha Maamulka Kiiska iyo Hay'adaha Daryeelka Bixiya ee hela macluumaad ku saabsan dadka,

shaqaalaha daryeelka bixiya, shaqaalaha maamulka kiiska waa in ay raacaan shuruudaha looga baahan yahay wax soo sheegista, sida lagu tilmaamay [AR 20-099](#) iyo [Habka Waxyaabaha Dhici kara ee ODDS](#).

Si Daacadnimo leh,



Lilia Teninty  
Agaasimaha  
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

*Farriintii Agaasimihii hore ee ODDS ayaa laga heli karaa <http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>*

*Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.*

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811. Waan aqbalnaa wicitaanada nooc kasta leh ee adeegyada gudbinta farriimaha ee loogu talagalay Dadka dhagaha la, dhagaha la'-indhaha la', maqalku ku adag yahay ama qaba naafanimada dhanka hadalka. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan bixiyayaasha adeegyada gudbinta farriimaha booqo [www.oregonrelay.com](http://www.oregonrelay.com) ama [www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers](http://www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers).